

Hagaha Samaynta **Cayayaan-dile** Dabiici ah oo  
Kasamaysan Caleenta Geed **Hindiga** iyo **Toon**.



People  
Change  
the World  
**Diakonia**

 **KAALO**  
Aid and Development Org

 **PUNTLAND STATE**  
UNIVERSITY

# Hagaha Samaynta **Cayayaan-dile** Dabiici ah oo Kasamaysan Caleenta Geed **Hindiga iyo Toon.**

Waxaa soo-saaray Hay'adda **Kaalo Aid & Development.**  
Qeybta **MEAL ~ Communications**

**Adrees-ka X.DH:** wadada Cabdiyare, kasoo horjeedka  
Spaghetti House, HLG-ZA-353, Garoowe – Soomaaliya.

**Xiriirka:** info@kaalo.org | program@kaalo.org

**Mareegta:** www.kaalo.org



Booqo Mareeg-ta KAALO, si aad u hesho Hagayaal kale.

 <https://kaalo.org/knowledges/>

# Maxay tahay inaad ka ogaato **Samaynta Cayaan-dilahan dabiiciga ah?**

Samaynta cayaan-dillahani wuxuu uu ka koobanyahay 100 garaam oo Toon iyo caleemaha geed hindiga oo lagu qasay 1 litir oo biyo ah si ay uga soo baxdo milan ama isku-qas waxtar leh. Marka kowaad, Milan toon ah iyo mirimiri ah ayaad goonidiisa u diyaarinayaasa. Inta ka dib waad isku gayn oo si wacan iskugu qasin. *Haddaba hadii aad rabto xaddi intaa ka badan habkaan hoose isticmaal.*

## **Milan Geed Hindi ah**

- 1 kiilo oo caleenta geed Hindi-ga ah
- 10 litir oo biyo ah
- Dhowr dhibcood oo saabuunta weelka ah

## **Milanka toonta**

- 1 kiilo oo toon ah
- 10 litir oo biyo ah
- Dhowr dhibcood oo ah saabuunta dhagaxa ah.



# Talaabooyinka aad u baahantahay si aad u samayso **Cayayaan-dilahan dabiiciga ah?**

## (1) Diyaari milanka caleemaha geed hindiga

- Soo ururi caleemaha geed hindiga, sificana u mayr.
- Ka dib ku karkari 10 litir oo biyo ah muddo 30 daqiiqo ah.
- Ka dib qabooji kana miir biyaha.
- Ku dar dhowr dhibcood oo saabuunta dhagaxa ah, si wacana iskugu qas; Tani waxay kaa caawinaysaa geedka in dawadu qabsato marka lagu buufiyo.

## (2) Diyaarinta milanka toonta

- Diir toonta oo burburi, ka dhig xanjo/cajiin oo kale.
- Ka dib ku qas 10 litir oo biyo ah, 24 saac meel kaligeed dhig.
- Ka dibna ka miir biyaha kuna dar dhibco saabuun dhagaxda.

## (3) Isku dar labada hab ee hore (Milanka Toonta & Milanka Caleemaha geed Hindiga).

- Ku qas weel ku filan labada milan ee kor ku xusan.
- U kaadi muddo usbuuc ah.
- Ku shub agab ku haboon kuna buufi beertaada.
- Isticmaal asbuuc ka dib.



# Talaabooyinka aad u baahantahay si aad u samayso **Cayayaan-dilahan dabiiciga ah?**

## **(4) Kaydinta**

Ku kaydi Jirigaano (Jerry cans) ama caagado muddo 3 bilood ah adoo dhigaya goob qalalan sidoo kale aan kulayl ahayn. Muddo saddex bilood kabadan oo ka bilaabmaysaa marka isku qaska labadan milan lasameeyay lama isticmaali karo cayayaan-dillahan.

## **(5) Faa'iidooyinka Cayayaan-dilahan Dabiiciga ah**

**La dagaalanka Cayayaanka:** Waxay si gaar ah uga hortagtaa duqsiga cad (Whiteflies) & Mealybugs, iwm.

**Ku habboon xilliga roobka:** Waxay aad ugu haboontahay xilliyada roobka ee ay cayayaanku badanyihiin.

**Kordhinta dakhliga beeraleyda:** Waxay kordhisaa wax soosaarka, taasoo u sahlaysa beeraleydu inay suuq geeyaan dalagooda sida Yaanyada.

**Saaxiib bay'ada ah:** Ma keento wax dhibaato ah oo bay'adda wax yeeleeysa.

**Ka hortagga adkaysiga cayayaanka:** Cayayaanka uma sahlayso in ay la qabsadaan daawadan sida kiimikooyinka.



# Ma Ogtahy?

Toonta waa difaace dabiici ah oo disha cayayaanka beeraha. Waxay ka koobantahay Sulfur si ay uga hortagto cayayaanka, urkeeduna wuxuu carqaladeeyaa korintaanka cayayaanka beeraha. Sidoo kale, waxay leedahay awood ay kaga takhallusi karto bakteeriyada iyo Fangaska ah, taas oo difaac u noqonaysa dhirta.

Waxaa diyaariyay Hay'adda **KAALO** iyo **Jaamacadda PSU**; Waxaana maalgaliyay **GARP Project–Diakonia**.

**Jaamacadda Puntland State (PSU)**

(i) Abdikarim Adam Jama, (ii) Abdullahi Ali Aden,  
(iii) Ahmed Mohamed Aden.

**Hay'adda KAALO**

(i) Mohamed Aidarus Mohamud,  
(ii) Abdikhaliq Mursal Yusuf.

